MAINE PAID FAMILY & MEDICAL LEAVE

# Isku Diyaari inaad Codsato Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato (PFML)

Waa kuwan waxyaalo muhiim ah oo ay tahay inaad ogaato kahor inta aadan gudbin codsiga Maine PFML. Kadib markaad codsato, waxa dhici karta inaad hesho tilmaamo dheeraad ah oo aan halkan ku qornayn.

Ha illaawin, had iyo jeer waxaad booqan kartaa www.maine.gov/paidleave si aad u hesho macluumaadka ugu dambeeyey ee ku saabsan barnaamijka.

**Marka koowaad: la hadal loo-shaqeeyahaaga markaad ogtahay inaad u baahan doonto fasax.**

✓ Haddaad sii ogtahay inaad u baahan doonto fasax, waa inaad u sheegto loo-shaqeeyahaaga ugu yaraan 30 maalmood hortood inta uusan fasaxaagu bilaaban. Ugu sheeg qoraal - qoraal ama iimeyl ayaa la oggol yahay! Haddii aadan sii ogayn inaad u baahan doonto fasax - tusaale ahaan, hadday jirto xaalad gurmad ah - waa inaad ugu sheegto sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah. Tani waxay fursad u siin doontaa loo-shaqeeyahaaga inuu ka diyaargaroobo shaqada aad ka maqnaan doonto. Hadduu ka diyaargaboobi karo inuu daboolo shaqadaada, aad ayey u yar tahay inuu kugu dhaho fasaxaaga dib u dhigo si looga fogaato Dhibaato Aan Lagu Talogalin oo ku dhacda ganacsigiisa.

✓ Waydii loo-shaqeeyahaaga halka laga codsado. Haddii loo-shaqeeyahaagu ka qaybqaadanayo qorshaha dadwaynaha, wuxuu kuu sheegi inaad ka codsato Aflac oo ah maamulaha qorshaha dadwaynaha Maine PFML. Hadduu ka qaybqaadanayo qorshe gaar ah, wuxuu kuu sheegi halka laga codsado ee qorshahaas (sida caadiga ah taasi waxay noqon shirkad caymis ama shirkad kale, laakiin mararka qaar waxay noqon qof ama koox ka tiran shirkadda loo-shaqeeyaha).

✓ Kala hadal loo-shaqeeyahaaga mushaharka muddada aad shaqada ka maqan tahay. Gunnooyinka Maine PFMP waxa loogu talogalay inay ka yaraadaan mushaharkaaga caadiga ah. Haddaad rabto inaad isticmaasho wax ka mid ah fasax mushahar leh oo kale (sida PTO) si aad "wax uga isticmaasho" mushaharkaaga caadiga ah, waxaad u baahan tahay inaad kala hadasho loo-shaqeeyahaaga arrintaas, waxaanad u baahan doontaa inaad tusto lacagaha gunnooyinkaaga Maine PFML si uu markaa iskugu dhufto xisaabta oo uu u soosaaro. Sidoo kale, xasuusnaw, waxa jira 7 maalmood oo bilaa mushahar ah oo sugitaan haddaad qaadanayso fasax caafimaad, si aad markaa u rabi karto inaad isticmaasho PTO ama wakhtiga jirrada si mushaharka laguu siiyo markaa.

**Markaa, isku diyaari inaad codsato.**

Markaad gudbinayso codsigaaga, diyaar u ahaw inaad ka jawaabto su'aalo ku saabsan:

- ✓ Sababta aad fasaxa ugu baahan tahay
- ✓ Goorta aad fasaxa u baahan tahay, iyo muddadu inta ay leeg tahay
- ✓ Halka aad ka shaqayso
- ✓ Macluumaadkaaga xiriirka, oo uu ku jiro Lambarkaaga Sooshal Sekuuritiga
- ✓ Halka aad rabto in lacag-bixinahaaga gunnadu aaddo, haddii lagu oggolaado - haddaad bixiso macluumaadka bangigaaga, gunnooyinkaaga waxa lagu bixin karaa dhigaal toos ah
- ✓ Haddii uu ku soo galayo dakhli kale muddada fasaxaaga - meesha uu ka imanayo iyo xaddigiisa

Kadib markaad gudbiso codsigaaga, maamulaha (Aflac, haddii loo-shaqeeyahaagu ku jiro qorshaha dadwaynaha) ayaa waraaq kuu soo diri doona. Waxay sharrixi doontaa hannaanka sheegashada, waxayna kuu sheegi macluumaadka aad u baahan tahay inaad bixiso kahor inta aysan go'aan ka gaarin sheegashadaada. Waa kuwan tusaalayaal waxyaalaha aad u baahan karto inaad dirto:

- ✓ Caddaynta aqoonsigaaga
- ✓ Foom caddayn ah oo uu buuxiyey dhakhtarkaaga, haddaad qaadanayso fasaxa caafimaad
- ✓ Foom caddayn ah oo uu buuxiyey dhakhtarka xubinta qoyskaaga, haddaad fasaxa u qaadayso xubin qoys
- ✓ Caddaynta dhalashada ama meelaynta ilme, haddii aad fasaxa u qaadanayso si aad isku barto ilme cusub
- ✓ Foom sharraxaya xiriirka aad la leedahay cidda aad fasaxa u qaadanayso si aad u daryeesho, haddii qofkaasi uusan ahayn xubin qoys oo sharci ah laakiin aad la leedahay xiriir shakhsi ahaaneed oo muhiim ah

**La xiriirista Aflac ayaa kaa caawin karta hannaanka sheegashadu inay si fiican u dhacdo.**

- ✓ Waxaad dooran kartaa sida Aflac kuula soo xiriirayso: waraaqo boostada lagu diro, ama si elektaroonig ah oo boortalkooda la adeegsanayo. Sidoo kale waxaad kala xaali kartaa inay wargelino kuu soo diraan marka sheegashadaada wax ka soo kordhaan.

- ✓ Mar kasta oo aad ku dhakhsato bixinta macluumaadka iyo dokumentiyada, waa mar kasta oo Aflac ku dhakhsan karto inay dib u eegto sheegashadaada oo go'aan ka gaarto.

- ✓ Haddii Aflac ay gaarto go'aan aadan ku raacsanayn - hadday diidaan codsigaaga, ama hadday kuu ansixiyaan lacag aad u malaynayso inay qaldan tahay - waxaad codsan kartaa dib-u-eegis adigoo buuxinaya foomka Codsiga Dib-u-eegista kuna celinaya Aflac. Si deggan u akhri waraaqaha Aflac kuu soo diraan, sababtoo ah waxa ku qornaan doona macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tan iyo hannaanada kale.